

## WARQADDA CADDAYNTA CAAFIMAADKA EE TABARUCA DHIIGGA XUDUNTA

Enhetsnummer plats för etikett:

Hooyada, magaca: <i>Mor, Namn:</i>	Aabaha, magaca <i>Far, Namn:</i>
Hooyada, Lambarka shakhsiga: <i>Mor, Personnr:</i>	Aabaha, Lambarka shakhsiga: <i>Far, Personnr:</i>
Qoomiyada/Meesha laga soo jeedo hooyada: <i>Etnicitet mor:</i>	Qoomiyada/Meesha laga soo jeedo aabaha: <i>Etnicitet far:</i>

Lr	Uga jawaab dhammaan su'aalaha sidaad u garanayso	HAA (JA).	MAYA (NEJ).
1	Uurkaagan ma mid ka abuurmay ugxan/natiijo ukun- ama shahwad lagu deeqaybaa?		
2	Adiga ama Aabaha ilmaha miyaa la soo korsaday?		
3	Adiga iyo Aabaha ilmuhu ma qaraabo ayaad tihiin?		
4	Ma qaadataa dawooyin ama ma qaadatay muddada uurkaaga? (marka laga reebo fiitamiinnada iyo kiniinka xadiidka)		
5	Ma jiraan cuduro hiddo-raac oo adiga, walaaladaa, walaalada ilmaha, ilmaha aabihii/ilmaha aabihii walaaladood ama ilmaha awoowyaashi/ayeeyooyinkii?		
6	Ma jiraan cuduro dhiigga, difaaca ama dhiigbax ah oo adiga, walaaladaa, walaalada ilmaha, ilmaha aabihii/ilmaha aabihii walaaladood ama ilmaha awoowyaashi / ayeeyooyinkii?		
7	Ma jiraan cuduro hiddo-raac oo lafaha ku dhaca oo haya adiga, walaaladaa, walaalada ilmaha, ilmaha aabihii/ilmaha aabihii walaaladood ama ilmaha awoowyaashi/ayeeyooyinkii?		
8	Ma jiraan cuduro hiddo-raac dheefshiidka ah adiga, walaaladaa, walaalada ilmaha, ilmaha aabihii/ilmaha aabihii walaaladood ama ilmaha awoowyaashi/ayeeyooyinkii?		
9	Waligaa ma ku dhacay kansar ama cudur kale oo khatar ah oo daaweyn dheer qaatay adiga, aabaha ilmaha, ama ilmaha walaaladii?		
10	Ma ku dhacay cudurka HIV ama cagaarshow adiga, aabaha ilmaha, ama ilmaha walaaladii?		
11	Baadhitaannadii lagugu sameeyay ee HIV, cagaarshow iyo waraabow ma noqdeen kuwa lagaa waayay xannuunadaa?		
12	Miyaa dalka Iswiidhan dibaddiisa lagaaga mudmuday irbadaha cilaajka ama lagugu sameeyay khad tattuu/daloolin?		
13	Lacag ma ka bixisay ama lacag ma lagugu siiyay galmo 12kii bilood ee ugu dambeeyay?		
14	Waligaa ma isku mudday (irbad) mukhaadaro ah ama wax kale meel ka baxsan dhakhtar?		
15	Miyaad leedahay ama yeelatay kaneeco 3dii sano ee ugu dambeeyay?		
16	Miyaad leedahay ama ma kugu dhaceen cudurada kale ee dalalka cimilada kulul?		
17	Miyaad leedahay ama ma yeelatay cudurka tiibbayda 3dii sano ee ugu dambeeyay?		
18	Adiga ama Aabaha ilmuhu ma deganaydeen dalalka yurub ka baxsan in ka badan 5 sano?		
19	Miyaad dibada uga baxday dalalka Nordigga (Sweden, Denmark, Norway, Finland)?		
20	Miyuu ku dhacay cudurka Creutzfeldt-Jacobs qof ka mid ah qoyskaaga ama qoyska ilmaha Aabaha?		
21	Waligaa ma lagugu shubay dhiig ama lagugu beeray (beddelay) unugyo ama xubin kale?		
22	Miyaad leedahay ama kugu dhaceen cudurada difaaca jidhka oo unugyada weerara ama roomatism?		
23	Ma qaadatay dawooyinka difaaca jidhka hoos u dhiga 12kii bilood ee u danbeeyay?		
24	Ma lagu tallaalay 12kii bilood ee u danbeeyay?		
25	Ma kugu dhacay infekshan halis ah ama cudur kale oo halis ah inta aad uurka lahayd, kaas oo u baahday daaweyn gaar ah iyo kormeer caafimaad?		
26	Ma caadi bay ahaayeen baadhitaannada ultra-soundka iyo biyaha ilmaha inta aad uurka lahayd?		

Waxaan halkan ka caddaynayaa in aan si dhab ah uga jawaabay warqaddan caddaynta caafimaadka:

Taariikhda \_\_\_\_\_

Saxeexa hooyada: \_\_\_\_\_



## WARQADDA CADDAYNTA CAAFIMAADKA EE TABARUCA DHIIGGA XUDUNTA

**Qaybtan hoose waxa buuxinaya umuliso u shaqaysa Bangiga Dhiigga Xudunta ee Qaranka (Nedanstående fylls i av barnmorska anställd av Nationella navelsträngsblodbanken)**

**Komplettering till frågor på hälsodeklarationen:**

.....  
 .....  
 .....  
 .....  
 .....

Namn på den som frågat/tagit emot svaren: \_\_\_\_\_

Namnteckning \_\_\_\_\_

ID kontroll utförd: Godkänt leg  annat  ange: \_\_\_\_\_ Sign: \_\_\_\_\_

**Godkännare av tillvaratagandet (enl.SOSFS 2009:30)**

Datum: \_\_\_\_\_ Namnteckning: \_\_\_\_\_ Titel: \_\_\_\_\_

### Övrigt

**Normal graviditet enligt mödravårdsjournal**

Vid avvikelser angående mors sjukhistoria, graviditet och förlossning,  
 Bifoga MHV1,2,3 och ev. journalanteckning för bedömning av medicinskt ansvarig

Mor Hb g/L..... ( Ej godkänt Hb för donation < 90 g/L)

Sign:.....

### Kompletterande uppgifter till följesedel:

Klinisk undersökning av barnet

Inga avvikelser  Noterade avvikelser

Vid avvikelser bifoga FV2 och ev. journalanteckning för bedömning av medicinskt ansvarig läkare

Sign:.....

Barnets personnr.	Barnnr.	Flicka	Pojke	Grav. vecka	Tid förlossning	Tid klampning	Tid insamling	In utero	Ex utero	Sign.
				+						
Vaginal *	Planerad sectio	Akut sectio	Agpar poäng	pH normalt	Ev. plasma utspädn.	Bifogat journalant	Moder vikt/datum	Vaginal* Stående <input type="checkbox"/>		Sign.
				Ja <input type="checkbox"/> Nej <input type="checkbox"/>	Ja <input type="checkbox"/> Nej <input type="checkbox"/>	Ja <input type="checkbox"/> Nej <input type="checkbox"/>		Rygg <input type="checkbox"/> Sida <input type="checkbox"/>		



## Sharaxaadaha su'aalaha caddaynta caafimaadka

*Waad ku mahadsantahay deeqista aad ku deeqaysid dhiigga xudunta.*

*Ujeedada su'aaluhu waa in dhiigga lagu deeqay uu noqon doono mid ammaan u ah dadka qaadanaya mustaqbalka.*

*Halkan waxaannu ku bixinaynaa sharaxaad dheeraada sababaha su'aalaha*

### Maxaanu jinsiyada/meesha laga soo jeedo kuugu weydiineynaa?

Unugyada nudda dhiiggu waa unugyada dhiiga cusub sameeya. Waxa laga helaa dhuuxa lafta iyo dhiiga xudunta dheer ee isku xidha ilmaha iyo madheerta hooyada. Marka qof xanuunsanaaya la siiyo unugyo nudda oo cusub ayay samayn karaan dhiig cusub oo caafimaad qaba. Si ay ugu shaqeeyaan waa in qofka bixinaaya iyo qofka qaadanaayaa ay yeeshaan HLA isku mid ah. HLA waxa weeye nooc ka mid ah calaamadaha unugyada, kuwaas oo difaaca jidhka ka caawinaaya inay gartaan unugyada qalaad. Caadi ahaan way kala duduwan yihiin noocyada HLA ee dunidu, sidaas darteed ayaa meesha uu qofku ka soo jeedo ay bixin kartaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan qaataha ay unugyada nuda dhiigga ku haboonaan karaan.

### Su'aasha 1 iyo 2: Korsasho iyo ku deeqid

Haddii uurku uu ku yimid ka dib marka ugxanta ama shahwada lagugu deeqay ama haddii adiguba aad qof la soo korsaday tahay ayaan mararka qaarkood waxba laga ogayn cudurrada qoysku leeyahay. Waa inaad marka su'aalaha uga jawaabto ilaa intaad ogtahay. Haddii lagu deego ugxan/shahwad/embriyada ayay u baahan tahay in ukunta/shahwadu ay ka timaado ku deeqe jooga Midowga Yurub/EEA oo ay daaweyntu u baahan tahay inay ka timaado Midowga Yurub/EEA gudahiisa. Waxaanu sidoo kale u baahanahay inaanu ogaano bangiga ugxanta ama shahwada aad isticmaasheen si aanu ugu ogaano rugta caafimaad ee ay ansixisay hey'ada ansixisa daryeelka caafimaad iyo daryeelka bukaanku iyo sidoo kale in haddii loo baahdo loogu ogaado xeerarka ku saabsan caafimaadka ku deeqaha ee bangigaas khuseeya.

### Su'aasha 3: Waalidka oo qaraabo ah

Waalidka ilmuhu hadday qaraabo dhow yihiin waxay kordhin kartaa khatarta cudurrada hiddo-raaca ee ilmaha. Ma aqbalno wax deeqitaan in la sameeyo haddii waalidka ilmaha laba walaalo kala dhaleen.

### Su'aasha 4: Dawo

Dawooyinka la qaato xilliga uurka la leeyahay waxay saameyn karaan mararka qaarkood ilmaha.

### Su'aasha 5-8: Cuduradda hiddo-raaca ee qoyska

Cudurada hiddo-raaca ee qoyskaagu iyagoo ku xidhan sida la isaga dhaxlo waxa laga qaadi karaa mararka qaarkood dhiigga xudunta, gaar ahaan, waxay khuseysaa cudurrada saameeya dhiigga, habka difaaca jidhka iyo hemostasis (xanuunada dhiigga), ama dheefshiidka jidhka. Liiska hoos ku qoran waxa ku jira tusaale xannuunada joojinaya in deeq la aqbal.

*Dhiig yaraan lagu dhasho: dhiig yaraan hiddo-raac ah (thalassemia major, sicklecellsanemi, Blackfan-Diamonds anemi)*



*Yaraan dhiigga cad ama unugyada xinjirta ee dhiigga oo lagu dhasho: hiddo-raac agranulocytos (cudurka Kostmanns , Schwachman-Diamonds iyo kuwa kale.) hiddoraac trombocytopeni (X-kromosombunden trombocytopeni, cudurka Wiskott-Aldrichs, cudurka Glanzmanns)*

*Xanuunnada difaac yaraan jidh oo lagu dhasho: difaac yaraan la isku daro oo aad u daran (SCID), xanuunka Wiskott-Aldrichs, xanuunka Omenns, xanuunka hyper-IgM, Brutons agammaglobulinemi (x-kromosombunden agammaglobulinemi, DiGeorge (22q11-deletionssyndromet, CHARGE), ataxia-telangiektasia, cudurka kronisk granulomatös (CGD), hemophagocytos (familjär (FHL), xanuunka Chediak-Higashis, xanuunka Griscellis typ 2, XLP (xanuunka x-linked lymphoproliferative)).*

*Osteopetros (cudur lafaha oo hiddo-raac ah).*

*Dhiigid dhibyar oo lagu dhasho (hemofiiliya (blödarsjuka), xanuunka von Willebrands)*

*Hiddo-raac qofka oo si fudud dhiig xinjirow ugu dhaco: dhiig xinjirow fudud (yaraan Borotiin S, yaraan Brotein C, yaraan Antitrombin iyo iska caabinta APC)*

*Cudurrada dheefshiidka Gaucher, Niemann-Pick, Mucopolysaccharidoser, Fabry, Wolman, Krabbe*

### **Su'aasha 9: Cudurrada halista ee qoyskaaga dhaw**

Cudurrada halista ah iyo daaweyntoodu waxay mararka qaarkood saameyn karaan ilmaha waxaanay ahaan karaan calaamad ku tusaysa cudur hiddo-raac ah oo qoyskaaga dhow ah.

### **Su'aasha 18-21: Cudurrada, dhacdooyinka iyo deganaashaha dalalka kale ee saameyn kara khatarta dhiiga xudunta lagu gudbinayo xannuunada faafa**

Dhacdooyin iyo dabeecadaha qaarkood waxay kordhin karaan khatarta in la qaado cudur faafa oo la isugu gudbin karo dhiigga xudunta, Su'aalaha arrintan ku saabsan ee aan u baahannahay inaan ku weydiinno waxaa maamulaa sharciga Sweden (SOF 2009: 30) cudurka Creuzfeld-Jakob waa cudur maskaxda oo faafa oo sidoo kale noqon kara hiddo-raac mararka qaarkood. Cuduro badan oo faafa waxay ku badan yihiin dalalka ka baxsan dalalka nordigga, waxay khuseysaa, tusaale ahaan: siifilis, HIV, cagaarshowga, qaaxada, mallaariyada iyo cudurrada kale ee dalalka cimilada kulaylaha ah. Tallaalka qaarkood (fayrus nool oo la daciifiyay) waxay keeni kartaa cudur ku faafi kara xilliga qalitaan xubin beddelid.

### **Su'aasha 22-26: Cudurrada xilliga uurka**

Cudurada iyo dhibaatooyinka uurka (iyo daaweyntooda) ayaa waxay ka dhigi kartaa in aanu deeqitaanka dhiigga xuduntu u habboonayn ammaanka ilmaha iyo ka qofka mustaqbalka qaadanaya Tani waxay khusaysaa, tusaale ahaan, siditaanka bakteeriyada aanay antibiyootikadu karayn , infekshanka xilliga aad uurka leedahay ama xilliga dhalmada , dhibaatooyin uurka ee daran sida preeclampsia (havandeskapsförgiftning) ama calaamado cudur ama koritaan aan caadi ahayn dhalasha ilmaha ka hor ama ka dib.

